

Maadooyinka loo yaqaan metanefriini iyo normetanefriini -dhiig qaadista saamigooda u diyaar-garobistiisa (S-MetNor)

(Metanefriini ja normetanefriini -verinäyteenottoon valmistautuminen (S-MetNor))

Inaad si sax ah ugu diyaar-garawdaa waa arin muhiim ah

Laba (2) maalmood iyo lababooda habeen ka hor inta aan saamiga dhiiga lagaa qaadin ma cabi kartid cabitaanadda kofeiinka leh sida kafeega ama qaxwaha, shaaha, kooko koolada ama cabitaanada tamarta laga helo. Mana cuni kartid moos, jalaato, shukulaato, faniilya, ukun, farmaajo, ama laws ama wax cunto ah oo laga sameeyay intaas aan soo sheegnay oo ay ku dhex jiraan ama uma dhawaan kartid. Sidoo kale nikotiintu waxyaalaha ay ku jirto (sida sigaarka iyo xanjada nikotiinta leh) isticmaalkooda waa in aad iska joojiiso oo ad iska ilaaliso.

Culays fisikal ah oo xamuul ah naftaada ha saarin (sida tusaale ahaan oradka, ama xitaa socod xawliga garaaca wadnaahaga siyaadiya, iyo jimesi hool la tago) waxaa wanaagsan inaad ka dheeraato oo aadan samayn hal (1) maalin iyo habeenkeed oo ka horaysa marka dhiiga saamiga ah lagaa qaadayo.

Ka hor inta aan dhiiga saamiga ah lagaa qaadin waa in aad si dagan u fariisato qiyaas 30 daqiiqo ah si xawliga dhiigaaga iyo dheef-shiidka cuntada ee jirkaagu u sinmaan oo u xasilaan.

Raac talooyinka uu dhakhtarku ku siiyo ee la xiriira daawo-qaadashada

Haddii aad daawo qaadato inaad daawadaas joojin karto ka hor inta aan saamiga dhiiga lagaa qaadin waa in aad weydiiso oo kala heshiiso dhakhtarka ku daryeela. Dhakhtarka ama kalkaalisada caafimaadka talooyinkoodi:

Talooyinka lagu siiyey oo aad sida ay yihiin u raacdaa waxay suurto galinaysaa in maxsuul lagu kalsoonaan karo oo maadooyinka lagaa baarayo ah la helo. Haddii aad talooyinkii lagu siiyey khilaaftay ama garab martay, fadlan u sheeg qofka saamiga dhiiga kaa qaadaya.

Faah-faahin dheeraad ah haddii aad u baahato

Haddii aad qabto wax su'aal ah waxaad soo wici kartaa oo weydiin kartaa lambarka adeega oo ah 09 471 86800 isniinta ilaa iyo jimcaha saacadaha u dhexeeya 7.30–15.30.

Waxaad ogaataa in aanaan nasiib daro jawaabta saamiga ka soo baxday lambarkan adeega loogu talo-galay laguugu sheegi karin.